

Miyaad heysaa qof gacan u baahan?

Warbixin ku saabsan gacanqabashada xigtada degmada Falköping.

Adigaaga xigtada ah

Miyaad heysaa ama aad la nooshahay qof qoyskaaga ka mid ah ama saaxiibkaa ah, waayeel ama dhallaan, oo curyaannimo, xanuun, da' ama balwad daraadeed taakulo u baahan?

Xigto ahaan, waxaad qofka u baahan gacantaada u tahay taakulo aan wanaageeda la soo koobi karin. Waxaad u qabaneysana micno weyn ayey ugu fadhiyaan tayada noloshiisa.

Xigto ahaan waxaad adiguba u baahan tahay gacan iyo wakhti adiga kuu gaar ah, taakulo jir iyo maskax ahaanba kuu fududeysa nololmaalmeedkaaga. Gacanqabashada xigtada waxaa looga gol leeyahay in iyadoo la tixgelinayo baahidaada gaarka ah, lana adeegsanayo habab kala duwan lagaa fududeeyo xaaladda aad ku sugan tahay. Taakulada aad heli kareysaa waxey hadba ku xiran tahay baahidaada iyo xaaladdaada nololeed.

Taakulada la heli karo waxaa ka mid ah

- ⤴ In lagaa nefiyo xigto-haynta
- ⤴ In muddo gaaban ama muddo dheer lagaa soo hayo oo la hawlgeliyo qofka aad caawineyso
- ⤴ Waxbarasho, koorasyo iyo casharo-jeedin
- ⤴ Wadahadal, keli ama koox
- ⤴ Qalab fududeeya shaqada ama/iyo dhaqdhaqaaqa
- ⤴ Xiriirin urur
- ⤴ Nasasho
- ⤴ Taakulo lagu hagaajinayo caafimaadka

Ku soo dhawoow wadahadal iyo faahfaahin

Iskudubbaride xigto

Maia Nilsson

0515 – 88 53 35 0730 48 28 52

maia.nilsson@falkoping.se

Xarun warbixineed

0515 – 88 51 00

Isniin – jimce, saacadaha u dhexeeya 11 – 15

www.falkoping.se/social